Jaahwareerka dhaqaalaha adduunka: Maxaa sababay sideese loo xallin karaa?

Saciid Cali Shire

Hordhac

Sadexdii asbuuc ee la soo dhaafay, waxa sayladaha saamiyadda aduunka (world stock markets) hareereeyey roobab wata duufaano. Roobaabkaas oo markii hore ka soo bilaamay wadanka Maraykanka, maanta, waxay ku baaheen aduunka oo dhan. In kastoo dadka wax odorosa, xoogoodu, arkayeen saamaynta roobabkaasi ku yeelan karaan koboca dhaqaalaha adduunka, haddana qofna ma sawiranayn in xaaladu sidaan u ekaan doonto. Dadka aqoonta iyo waayo aragnimadda u leh dhaqaalaha, hay'adaha dhaqaalaha iyo maaliyada (sida IMF), gudoomiyayaasha bangiyada dhexe ee wadamadda warshadaha leh, dhamaan waxay isku raacsan yihiin in qarka loo istaagay bur-bur dhaqaale. Waxa kaliya oo ay ku kala duwan yihiin waa in bur-burkaas laga badbaaday iyo in wali hardidiisii dhabta ahayd soo maqan tahay.

Qoraalkan koobanu wuxuu ugu horayn muuqaal ka bixinayaa sidii iyo meeshii masiibadaasi ka soo bilaamatay; dhaawaca ay u geystay dhaqaalaha adduunka;iyo siyaabaha kala duwan ee loo wajahay. Qaybta labaad ee qoraalkan, oo soo bixi doona maalmo ka dib, ayaan ,hadii Eebe idmo, si gooni ah ugu lafa guri doonaa saamaynta dhibaatadani u geysan karto Soomaaliya iyo Soomaalida iyo siyaabaha lagu xallin karo.

Bilowgii jaahwareerka

Bartamihii 2007 ayaa lagu baraarugay jaahwareer dhaqaale. Baraarugaas waxa saldhig u ahaa hoos u dhac ku yimid qiimaha guryaha ee waddanka Maraykanka. Waxa qiima dhacaas weheliyey, jaahwareer saameeyey bangiyada iyo hay'adaha bixiya daymaha guryaha (mortgage). Hoos u dhacaas iyo jaahwareerkaas waxa saldhig u ahaa deymo aan loo meel dayin oo la bixiyey 10-kii sano ee ka horeeyey. Daymahaas oo loo yaqaano 'subprime mortgage' waa daymo la siiyo dad aan dhaqaale ahaan awoodin in ay guryo gataan. Si ay khatarta u yareeyaan, bangiyada iyo hay'adaha bixiyey daymahaasi, waxay daymahaas ku dhex dareen daymo kale oo wannaagsan, dabadeedna waxay ka gadeen sayladaha daymaha (securitisation).

Markii hurdadii laga toosay, waxa la arkay, in qiimaha guryuhu si xad dhaaf ah hoos ugu dhacay (20-50%). Waxa kale oo la arkay in daymihii lagu qaatay guryahaasina aysan wax qiimo ah lahayn. Arintaasi waxay sababtay in kalsoonidii iyo aaminkii lagu qabay bangiyada iyo hay'adaha bixiya daymuhu aad hoos ugu dhacay. Hoos u dhacaasi wuxuu sababay in bangiyadii joojiyeen daymihii ay kala qaadan jireen. Sidoo kale waxa gebi ahaanba is taagay daymihii cusbaa oo la siin jiray macaamiisha.

Waxa, la is waydiin karaa, waxaa keenay in bangiyadu markii horena dad aan u qalmin dayn siiyaan, markii danbena daymihii oo dhan joojiyaan. Si loo fahmo arrintaas, waxa loo baahan yahay in waxoogaa dib loo noqdo.

Laga soo bilaabo 1997-dii, aduunka xoogiisu, wuxuu ku raaxaysanayey koboc dhaqaale. Shaqo la'aantu aad bay hoos ugu dhacday, qiimaha hantida ma guurtada ihina (siiba guryaha) si aad ah ayay sare ugu kacayeen. Arrintaasi waxay sababtay, in, bangiyaddu debciyaan shuruudihii daymaha. Waayo, waxaa la arkayey in qof waliba awoodo in uu iska bixiyo daymahaas. Arintaasi waxay sababtay in dad badan oo aan istaahilin in daymo la siiyo ay gataan guryo qiimohoodu mararka qaarkood 6 jeer ka badan yahay dakhligooda.

In kastoo intii mudo ah la hadal hayey in la bixiyey daymo ay adag tahay in la soo xereeyo; hadana, cidna dheg jalaq uma siin. Tusaale ahaan, Jan Hatzius, oo ah dhaqaaleyahan la taliya Goldman Sachs wuxuu November 2007 ku qiyaasay khasaaraha ka dhalanaya daymahaas aan loo meel dayin $2 bilyan.

Bur-bur ku yimid suuqaas loo yaqaano 'sub-prime mortgage'-ka ayaa saamayn xoogan ku yeeshay bunuugta iyo sharikaadka kale ee maaliyadaha. Arintaasi waxay dhashay dhibaato loo yaqaan 'credit crunch'. Credit crunch waa dhibaato timaada marka ay aad u yaraato lacagaha daymaha ah ee bunuugtu

bixiyaan. Yaraantaasi waxay timaadaa marka bunuugta iyo hay'adaha kale ee daymaha bixiyaa dareemaan baaxada dhibaatadii ka dhalatay lacagihii hore ee ay damaha u bixiyeen. Waxa arintaas badanaa dhinac socda qiima dhac ku yimaada hantida ma guurtada ah. qiime dhacaasi wuxuu saamayn baaxad weyn ku yeeshaa saamiyada bangiyada iyo hay'adaha daymaha bixiya.

Aan waxoogaa bayaamiyo arintaan. Ka soo qaad in qof kal hore gatay guri qiimihiisu ahaa £200,000. Ka soo qaad in qofkii shaqo la'aan ku dhacday oo uu dayntii bixin kari waayey, sidoo kale ka soo qaad in qiimaha guryuhu hoos u dhacay 40%. Bangigu waxa kaliya ee uu samayn karaa waa in uu gurigii dib ula wareego, laakiin xusuuso, gurigu bangiga wuxuu ugu qiimaysnaa £200,000, hadana qiimihiisu waa £120,000. Meeshaas waxa dhacay wax loo yaqaano 'negative equity'. Marka bangigu la wareego kumanaan guryo ah oo midwalba qiimihiisu hoos u dhacay 30-50%, maxaad ka filaysaa in bangigaas ay soo food saarayso. Waxa intaas weheliya, marka bangiga lacagtii hore ee daymaha ahaana u soo xeroon waayaan, daymo cusubna uu waayo oo suuqa daymuhu (credit market) qalalo, maxaad ka filanaysaa meeshaas!. Suuqa daymaha waxaa keena in uu qalalo shaki laga qabo sii jirtaanka bangiyadda.

Arinta labaad waa arin salka ku haysa sida sayladaha saamiyadu u shaqeeyaan tobakii sanno ee la soo dhaafay. Intii mudo ah, sayladuhu waxay ahaayeen kuwo la hadal hayo oo marar badan la isku dayey in wax laga bedelo nidaamka ku salaysan 'speculation'-ka. Nidaamkaasi waa nidaam ka faa'iidaysta ceebaha saylada, qaybna ka ahaa jaahwareerka maanta dawadiisa meel kasta laga baadigoobayo. Arrintaan oo qaybo ka mid ah, sida 'short selling' la mamnuucay, wali waxa ka bannaan godad ay adag tahay in la daboolo.

Arinta sadexaad, waxay la xiriirtaa sicirbarar ku yimid cuntada iyo shidaalka. Oo tusaale ahaan, meesha fuustada shidaalka ihi 10 sano ka hor ahayd $12, waxay dhamaadkii bishii hore madaxa la dhaaftay $145. Dhinaca cuntada, qiimuhu wuxuu sare u kacay wax ka badan 25%-50%

Saamaynta dhibaatada

Roobkii watay duufaanaha, in kastoo si aad ah isha loogu hayey, haddana hal mar ayay ka hoos baxeen raadaarada adduunka, markaas bay ku dhufteen meel aan laga filayn. Bangigii ugu horeeyey ee dabayshu ku dhufato wuxuu ahaa 'Northern Rock' oo ku yaala waddanka UK. Bangigaas oo ka mid ah bangiyadda ugu waaweyn waddanka UK, markii la arkay in uu qarka u saran yahay in uu bur-buro ayaa dawladu si toos ah ula wareegtay ama u qaramaysay. Badbaadinta bangiggaasi wuxuu dawlada ugu kacay lacag sare u dhaafaysa £110 bilyan.

Bilo ka dib, ayaa dabayshii si xooggan ugu dhufatay bunuugta iyo sharikaadka daymaha guryaha bixiya oo ku yaala Maraykanka. Sharikaadkii u horeeyey ee duufaanuhu si naxariis darro ah ugu dhufteen waxay ahaayeen labada shirkadood ee ugu waaweyn dhanka daymaha guryaha oo loo kala yaqaan Fannie Mae iyo Freddie Mac. Labadaas shirkadood ayaa waxay mas'uul ka yihiin wax ka badan 50% daymaha guryaha ee wadanka Maraykanka oo sare u dhaafaya $12 triliyan.

Dabayshu waxay kaloo saamaysay bangiyo, caymisyo iyo sharikaad kale. Sharikaadkaas qaar waa la qarameeyey, qaar way dhinteen, qaar waxa qiime jaban ku gatay sharikaad kale, qaarna dawladaa badbaadisey. Tusaale ahaan, Wadanka USA, meesha AIG la caymiyey, Merrillynch la gatay, Lehman Brothers iyo WaMu waa dhinteen. Dhinaca UK, meesha Northern Rock iyo Bradford and Bingly la qarameeyey, HBOS waxa lagu gatay qiime aad u jaban. Dhinaca Jarmalka. Dawladu waxay badbaadisey Hypo Real Estate. Dhinaca Belgium iyo Netherlands way qarameeyeen bangigii Fortis. Iceland, way qaramaysay bangigii ugu waynaa wadankeeda Glitnir. Switzeralnd waxay soo bandhigtay waddo ay ku badbaadinayso UBS.

Saamayntu kuma koobna bangiyada oo kaliya, ee waxaa sidoo kale jaahwareer ku yimid sayladaha saamiyada aduunka. Tusaale ahaan, meesha, October 2007-dii, index-ka sayladaha saamiyada adduunku marayeen meeshii ugu saraysay taariikhda, asbuucaan, index-yada intooda badani waxay marayeen meeshii ugu hoosaysay ilaa 1987-dii. Sayladaha Maraykanka iyo Yurub badi waxay lumiyeen 20%-35%, meesha Japan lumisay 25%, Russia lumisay 30%, wadamada soo koraya sida Mexico lumisay 40%. Tusaale ahaan, sadexdii asbuuc ee la soo dhaafay oo kaliya, sharikaadka ka diiwaan gashan Sayladaha

Saamiyada ee Maraykanka waxa qiimohoodu hoos u dhacay $ 2 triliyan. Meesha kuwa Ingiriisku lumiyeen £250 bilyan.

In kastoo dabayshaani saamaysay dhamaan sharikaadka, haddana, waxay si goonu ah u saamaysay bangiyadda iyo hay'adaha kale ee daymaha bixiya. Tusaale ahaan, sida ka muuqata shaxda hoose, bangiyadda UK qaarkood waxay lumiyeen wax ku dhow 80% qiimohoodii, qaar kalena waa la qarameeyey, sida Bradford and Bingly iyo Northern Rock. Arrintaani ma aha mid ku kooban UK oo kaliya. Waddanka Maraykanka, meesha Lehman Brothers suuqa ka baxay, MaMu lagu gatay qiime aad u jaban, AIG, Fannie Ma iyo Freddie Mac waa la toleeyey (qarameeyey). Belgium iyo Netherland waxay si wada jir ah u toleeyeen bangiga weyn ee Fortis. Iceland waxay tolaysay Glitnir. Jarmalka iyo Switzerland waxay labaduba si buuxda isu dhinac taageen Hypo iyo UPS.

Bangiga	Qiimaha October 2007	Qiimaha October 2008	% hoos u dhacay
HBOS	35.4 billion	8.6 Billion	75%
LIOYDS	32.2 billion	15.5 billion	52%
Barclays	43.6 billion	26.3 billion	40%
RBS	75 billion	15.5 billion	79%

Saamayntaasi ma ahayn mid ku kooban sayladaha saamiyadda aduunka oo kaliya, waxa sidoo kale ilko beelay oo meel ay wax ka bilaabaan garan waayey hoggaamiyayaashii galbeedka. In kastoo la isku keenay wixii aqoon iyo waayo aragnimo la ururiyey 2000 ee sano ee la soo dhaafay, haddana ilaa hadda, xal lagu nasto lama hayo.

Jaahwareerka ku yimid hoggaamiyayaasha waddamada ugu qanisan adduunka waxa laga arki karaa kullamadii dhacay labadii asbuuc ee la soo dhaafay iyo sidii wixii ka soo baxay kulamadaasi ay wax saamayn ah ugu yeelan waayeen sayladaha adduunka. Tusaale ahaan, markii la soo afjaray shirkii Paris, France, ee ay hoggaamiyayaasha wadamada France, Germany, Italy, UK ku heshiiyeen in ay si wada jir ah u badbaadiyaan bangiyadooda, saacado ka dib, Jarmalku, wuxuu damaanad qaaday lacagaha yaala bangiyada Jarmalka. Lacagahaasi waxay sare u dhaafayaan €568 bilyan. Waxa intaas weheliyey in dawladu u gurmatay bangi kale oo qaramayntiisu ku kacday €65 bilyan (hypo Real Estate). Jaahwareerkaasi wuxuu ku soo beegmayaa xili senedka maraykanku ansixiyeen lacag lagu badbaadinayo bangiyada iyo sharikaadka maaliyada ee wadankaas oo dhan $700 bilyan. Walina la hadal hayo in dawlada dhexe sii daynayso lacago kale oo wax ka bedela liquidti-ga iyo in ay hoos u dhigayso dulsaarka.

Saamaynta dhibaatadani u geysatay dhaqaalaha adduunka

Su'aasha iswaydiinta lihi waxay tahay saamayn noocee ah ayay arintaasi ku yeelanaysaa guud ahaan dhaqaalaha adduunka, gaar ahaan waddamada Galbeedka?

Sida ka muuqata saadaasha dhaqaale ee Galbeedka, daruuro madow oo duufaano wata ayaa hareereeyey dhamaan waddamadaas. Laba arrimood ayaa ugu waaweyn khasaaraha dabaylahaasi geysanayaan: hoos u dhac ku yimaada koboca dhaqaale iyo shaqo la'aan baahda.

Haddaan ku hormarno hoos u dhaca. Waxa la isku waafaqsan yahay in kobocu aad u yaraan doono labada sano ee soo socda, waddamada qaarkoodna noqon doono mid taban (negative). Waxa arintaas mid la mid ah soo bandhitay Hay'ada Lacaha Aduunka (IMF) oo saadaalisay in koboc micne leh uusan jiri doonin labada sano ee fooda inaku soo haysa. Guddoomiyaha Bangiga Dhexe ee Maraykanka (Federal Reserve), Mr. Ben Bernanke, mar uu



la hadlayey guddi loo xilsaaray dhibaatooyinka soo foodsaaray dhaqaalaha maraykanka, wuxuu farta ku fiiqay in maraykanku qarka u saran yahay hoos u dhac dhaqaale.

Dhinaca UK, Peter Spence, dhaqaale yahanka ugu sareeya Ernst & Young, ayaa xaqiijiyey in hoos u dhaca dhaqaale mar hore ku bilowday UK. Wuxuu intaas ku daray in sanadkaan iyo sanadka xigga labadaba koboca dhaqaaluhu hoos u dhici doono 1%.

Dhinaca shaqo la'aanta, Maraykanka, mar hore ayay shaqo la'aantu sare u dhaaftay 9.5%. 2.2 milyan qof ayaa shaqo la'aan noqday ilaa sanadkii hore hadaa. UK, sadexdii bilood ee la soo dhaafay kaliya waxa shaqo la'aan ku dhacday dad sare u dhaafaya 164,000. Yurub inteeda kale, Kanada, Ustaraaliya dhamaantood si xoog ah ayaa loo dareemay shaqo la'aanta.

Sidee loo wajahay dhibaatadaan

Bilowgii hore, dhibaatada waxa loo arkayey mid ku kooban waddamo iyo saylado gaar ah. Arintaasina waxay keentay in waddan walba wixii uu dawo u arkayey ku dhaqaaqay. Tusaale ahaan, 3 bilood ayay ku qaadatay dawladda Ingiriiska in ay go'aan ka gaarto Northern Rock. Sidoo kale dawlada Ireland, iyadoon la tashan dawladaha ay lacag waddaaga yihiin ee ay iskula jiraan Yuuroda (euro) ayay dammaanad qaaday dhamaan lacagaha yaala bangiyaddooda. Maraykanku, in kastoo mar gurriga odayaashu dib u soo celiyeen, hadana waxay soo bandhigeen lacag gaaraysa $700 bilyan oo ay ku badbaadinayaan niddaamka maaliyada ee waddankaas.

Markii la arkay in niddaamka kali kalida ihi uusan shaqaynayn, ayaa markii danbe la goostay in si wada jir ah loo wajaho jaahwareerka galay sayladaha maaliyadda aduunka. Weerarceliskaan cusub oo uu abaanduule ka ahaa dawlada Ingiriisku wuxuu ka koobnaa sadex qaybood: (1) in la damaanad qaado lacagaha yaala bangiyada; (2) in qayb ahaan la qarameeyo bangiyadda; (3) in lacag lagu harqiyo suuqyada lacagaha si bangiyadu u helaan lacagaha ay u baahan yihiin. Waxa arrintaas dhinac socday dulsaarka oo hoos loo dhigay, iyo sharciyo cusub oo mamnuucaya qaar ka mid ah habdhaqanka ganacsiga sayladaha.

Gabagabo

Haddaan soo ururiyo waxan oran karaa, adduunku wuxuu qarka u saran yahay hoos u dhac dhaqaale. Hoos u dhacaan, waxa la hadal hayaa in uu qayb ahaan ka dhib badnaan doono kii dhacay 1987-dii. Asbaabaha keenaya in uu ka dhib badnaadona waxa ka mid ah isku xirnaanta dhaqaalaha adduunka iyo awoodda iyo baaxadda sharikaadka. Tusaale ahaan, bangiyadda waddanka Iceland, waxa loo haystaa daymo 5 jeer ka baddan dhaqaalaha waddanka Iceland oo dhan. Si kastaba ha ahaatee, waxa muuqata in si wadajir ah loo wajahay dhibaatadaas. Daawooyinka la siiyey in ay si fiican u shaqayn doonaan iyo in ay maalmo xumadda hoos u dhigi doonaan oo jiraddu mar labaad soo laba kaclayn doonto maalmaha foodda inaku soo haya ayaan oggaan doonaa.

Saciid Cali Shire
B.Sc (Hon), PGD, M.A., M.Sc., M.Phil, MIBC, MIIBF

Saciid, waa la taliye, cilmibaare iyo qoraa. Dhinaca la talinta, Siciid wuxuu sharikaadka kala taliyaa wax kasta oo saamayn ku yeelan kara koboca, faa'iidada iyo jiritaanka ganacsiga. Dhinaca cilmibaarista, Siciid wuxuu daraasado joogto ah ku sameeyaa ganacsiga iyo ganacsatada Soomaalida. Siciid wuxuu hayaa xogta ugu balaaran (data base) oo laga hayo ganacsiga iyo ganacsatada Soomaalida.

Dhinaca qorista, Siciid wuxuu dhowaan daabacay buug muuqaal fiican ka bixinaya bilaabista, kobcinta iyo badbaadinta ganacsiga.

Saciid waxaad kala xiriiri kartaa:

e. saidshire@buuh.net
t. 44 (0) 7838 236 171
w. www.buuh.net